



## **WAR-SAXAAFADEED**

Waxa uu maanta oo taariikhdu tahay 13kii bisha May 2019, Kulan ku dhexmaray xafiiska gudoomiyaha Baanka dhexe, madaxda Baanka dhexe ee JSL iyo madaxda Baanka ganacsiga ah ee AMAL BANK.

Kulankan oo ujeedadiisu ahayd in la ogaysiiyo madaxda Baanka ganacsiga ah ee Amal Bank in la aqbalay codsigoodii, kana hawl gali karaan JSL.

Kulankan waxa goob-joog ka ahaa Wasiirka Wasaaradda Horumarinta maaliyadda Dr Sacad Cali Shire, waxa dhinaca baanka dhexe uga qayb galay kulankaas, Gudoomiyaha Baanka dhexe Mudane Cali Ibraahim Jamaac, Agaasimaha Guud ee Baanka dhexe Mudane Axmed Xassan Carwo, iyo Agaasimaha Qaybta kormeerka iyo Ruqsad-siinta Mudane Cabdiraxmaan Muuse Cabdi.

Dhinaca Baanka Amal, waxa hogaamiyey gudoomiyaha guud ee AMAL Bank mudane Siciid Cali Shire, oo uu wahelinayo Mudane Maxamed Daahir iyo qaar ka mid ah, mulkiilayaasha iyo gudida agaasinka (BOD) AMAL Bank.

Kulan waxaa lagaga wada hadlay sidii uu Amal Bank uga qayb qaadan lahaa koritaanka dhaqaalaha dalka sida

- shaqo abuurka dhalinyaradda iyo haweenka
- Taageeridda Ganacsiga yar yar
- Is dhexgal ganacsi ee geeska afrika

Agaasimaha Guud ee Baanka Dhexe, Ahmed Xasan Carwo ayaa ka waramay Xaaladda guud ee Haayaddaha maaliyadeed ee dalku ku sugan yihiin, isaga oo soo dhaweeyay in AMAL Bank ku soo biiraan saaxadda Baananka ee dalka, intaa ka dib, Gudoomiyaha Baanka Dhexe, Cali Ibraahim Jamaac ayaa si rasmi ah ugu bushaareeyay AMAL Bank ogolaashaha ruqsadda ay kaga hawl gali doonaan dalka, Sidoo kale, Wasiirka Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire ayaa isna kula dardaarmay in ay suuqa ku soo kordhiyaan adeegyo cusub iyo tartan maaliyadeed.

Dhinaca kale, Gudoomiyaha Guud ee Amal Bank Mudane Siciid Cali Shire ayaa ugu horayn balanqaaday in ugu yaraan 1500 oo dhalin yaro ah shaqo u abuuri doonaan saddexda sano ee soo socota, sidoo kale, waxaa uu sheegay in ay 1000 dumar ah ay siin doonaan daymo aan dulsaar lahayn. (Qardul Xasana).

Gudoomiyaha Guud ee Amal Bank waxaa uu sidoo kale sheegay in ay suuqa ku soo kordhin doonaan tartan iyaga oo ku taamaya in ay noqon doonaan Bangiga ugu horeeya ama ka labaad ee dalka.

Shirku wuxuu ku soo dhamaaday is-faham iyo is-afgarad.

Wa bilaahi tawfiiq

**Central Bank of Somaliland**

**May 14, 2019**